# BROGRAAMKA DEEQDA ISKAASHIGA BULSHADA RRF

*Waxaan ku hawlanahay abuurista brograamka deeqda bulshada loogu talogalay ururada aan fa'iidada doonin si loo taageero xariirka iyo kaalmada arjiga ee la siiyo Maaliyadda Kaalmada Kirada Boston (Boston's Rental Relief Fund) loona adeegsado munaasabadaha, taageerada farsamada, iyo iskuduwidda ka dhexeyso dagganeyaasha iyo milkiileyaasha hantida.*

## WARARKA HORE

Kuleylahaan Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability) iyo Shaybaarka Cusboneysiinta Guriyeynta Duqa Magaalada (Mayor's Housing Innovation Lab) waxay soo saareen brograamka deeqda bulshada ee loogu talogalay ururada aan fa'iidada doonin si ay u taageeraan xariirin dheeraad ah iyo kaalmada arjiga ee loogu talogalay Maaliyadda Kaalmada Kirada Boston (Boston's Rental Relief Fund) iyaga oo adeegsada munaasabadaha, taageerada farsamada, iyo iskuduwidda ka dhexeyso dagganeyaasha iyo milkiileyaasha hantida.

Luminta dakhliga taasoo ugu wacan xeritaanka ganacsiga iyo dugsiga/xanaanada cunugga iyo dhibaatada lagala kulmo helitaanka farsamada, shiddada COVID-19, waxay siyaadiyeen tirada dagganeyaasha dhibaatada ku qaba bixinta kirada taasoo iftiimisay tirada dagganeyaasha isku haleeya kooxaha bulshada iyo ururada aan fa'iidada doonin in ay galaan internetka si ay u helaan macluumaadka lagama maarmaanka ku saabsan adeegyada sharciga, kaalmada kirada, iyo ilaha kale ee ka hortaga ka-saaridda guriga.

In iskaashiga lala sameeyo kooxaha bulshada iyo ururada aan fa'iidada doonin ee awoodda u leh in ay helaan farsamada, ka hadlaan su'aalaha ku saabsan kirada iyo brograamyada kaalmada danabka, iyo taakuleeya dagganeyaasha iyo milkiileyaasha hantida si ay u soo saaraan warqadaha arjiyada dhamaystiran waxay hubineysaa in helitaanka kaalmada kirada degdegga ay suurtogal tahay xattaa marka lagu dhex jiro daruufo adag.

La shaqeynta kooxaha bulshada iyo ururada aan fa'iidada doonin oo kalsooni ku qaba bulshadaha ay adag tahay in lala xariiro kana mid ah bulshadaha aan ku hadlin Ingiriisiga, bulshadaha soo haajiray, iyo dagganeyaasha dakhligooda u dhexeeyo yaraan ilaa dhexdhexaad, kuwa helitaankooda farsamada kooban yahay, taasi waxay hubin doontaa in Maaliyadda Kaalmada Kirada (Rental Relief Fund) gaarto ujeedadeeda in si siman loo qeybiyo iyo waxay ku biirin doontaa dadaalka Magaalada ugu jiro in muraayadaha sinaanta isirada lagu fiiryo brograamyada jira.

Brograamka Deeqda Iskaashiga Bulshada RRF (RRF Community Partner Grant) wuxuu taageeri doonaa dadaalka si loo fahmo xiiladaha xariirinta, taageerada arjiga, iyo isgaarsiinta si loola kulmo baahida dagganeyaasha iyo milkiileyaasha hantida ee iskudaya in ay helaan kaalmada kirada iyo taageeraan shaqada shaqaalaha OHS iyo kuwa muhiimka ah ee danneya kana shaqeya iyo qeybiya bixinta kaalmada lacagaha kirada. Iskaashiga bulshada la xushay waxay soo saari doonaan iyo waxay fullin doonaan xariirika saddaxda bil iyo qorshaha ka-qeybgelinta loogu talogalay dagganeyaasha iyo milkiileyaasha hantida. Qiimeynta xiiladaha xariirinta iyo hababka ka-qeybgelinta kaddib, waxaa dhici karto in la dhaqan geliyo waxyaabaha laga bartay brograamka loona adeegsado muddo dheeraad ah iyo iskaashi.

## KOR KA EEGIDDA BROGRAAMKA DEEQDA

Brograamka deeqdaan wuxuu ku hawlan yahay abaal marrinta deeqda $150,000 si loo kordhiyo ama loo balaariyo xariirinta Kuleylaha 2021 ilaa Horaanta Qaboobaha 2021. Inkastoo abaal marrinta deeqda isbaddali doonto cabbir ahaan, arjiileyaasha waxay codsan karaan ilaa $20,000. Waxaan rajeyneynaa in aan maalgelino ilaa 10 urur kuleylahaan (Agoosto 2021 - Nofeembar 2021).

**Waxaa la soo hormarin doonaa kuwa soo socda:**

- Arjiyada laga helo hay'adaha si ay u balaariyaan xariirka lagu talogalay iyo ka-qeybgelinta dadyowga qaar ee la kulma halista dheeraadka xagga ka-saaridda sida bulshadaha ku hadla luqadaha aan ahayn Ingiriisi iyo reeraha caruurta qaba, iyo Madowga, Mareykanka Afrikaanka, Dhalladka, iyo reeraha Dadka Midabeysan (BAIPOC).
- Arjiyada ururada aan fa'iidada doonin ee ka jira xaafadaha Boston ay sida qaldan ay u saamaysay dagganaasho la'aanta guriyeynta kuna sugan halista in laga saaro guriga.

*Sharuudaha  Xaq u Yeelashada Arjiilaha*

- Arjiileyaasha ama wakiilada maaliyadda loo xilsaaray waa in ay ahadaan urur aan fa'iido doonin oo laga dhaafay canshuurta 501(c)3
- Wakiilada maaliyadda waxay u adeegi karaan sida wakiilka maaliyadda hal arji keliya
- Arjiileyaasha waxay dalban karaan oo keliya dadaalka ka-qeybgelinta ee socon doono inta uu socdo kuleylaha. Maalgelin LOOMA heli karo munaasabadaha halka waqti ah
- Kaalmada arjiga waa in ay ahaato lacag la'aan iyo waa in ay u furan tahay dhamaan dagganeyaasha Magaalada Boston

**Sharuudaha Qaataha**

*Haddii la doorto, waxaa loo baahan yahay waxa soo socda:*

- Arjiilaha iyo qorshaha xariirinta/ka-qeybgelinta waa in ay iminka socdaan ama bilowdaan ugu dambayn Agoosto 16, 2021 iyo waa in ay socdaan ilaa Nofeembar 12, 2021.
- Dadka qaata abaal marrinta waxaa laga rabaa in ay tagaan wargelinta Kaalmada Kirada (Rental Relief)
- Dadka qaata abaal marrinta waa in ay diyaar u ahadaan in ay todobaad kasta bixiyaan warbixin ku saabsan hawlaha xariirinta
- Dadka qaata abaal marrinta waa in ay soo gudbiyaan warbixin ku saabsan maaliyadda oo habeysan ugu dambayn 30 maalin dhamaadka muddada deeqda kaddib. Qaabka warbixinta waxaa keeni doono Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability)

*Maalgelinta waxaa loo adeegsan in lagu bixiyo kharashka soo socdo:*

- Shaqaalaha shaqeeyo qeyb ka mid ah waqtiga ama kuwa shaqeeyo waqtiga buuxa in ay iskuduwaan fullinta xariirinta iyo hawlaha ka-qeybgelinta (shaqaalaha waxay ku soo dari karaan dib u qorsheynta waqtiga la xariira xubinta shaqaalaha iminka jirta)
- Daabacaadda qoraalada xariirinta
- Ololaha internetka/meediyaha
- Farsamada lagu fududeeyo ka-qeybgelinta dagganeyaasha iyo milkiileyaasha hantida (fariimaha SMS, tabletyada/labtobyada, iwm.)

## SIDA LOO DALBADO

**Waxaa la qaban doonaa arjiyada ilaa Jimcaha, Luulyo 30**

*Fursadaha kale*

Ma danneysaa in aad heshid qoraalada xariirinta ee la xariira Maaliyadda Kaalmada Kirada (Rental Relief Fund) ama in aad martigelisid tababar la siiyo ururukaada oo ku saabsan ilaha dagganaashada guriyeynta ee laga helo Magaalada Boston? Fadlan iska qor halkaan.